# Warbixin Cusub oo ku Saabsan Provider Hub | Luulyo 2025

**Mawduuca:** Cusboonaysiinta Ku Saabsan Daah-furka Ruqsaynta Xannaanada Carruurta ee Qoysaska ee Provider Hub

***Fariintan waxaa loo diray dhammaan hay'adaha haysta ruqsadda/shatiga daryeelka carruurta ee qoyska ee Minnesota si ay uga warqabaan daah-furka shatiga daryeelka carruurta ee qoyska ee lagu maamulayo Provider Hub.***

---

## Waa Maxay Provider Hub

Provider Hub waa aalad interned ah oo loogu talagalay in lagu codsado shatiyo, maalgelin iyo barnaamijyo kale oo dowladeed.

Maanta, rugaha xannaanada carruurta ee haysta shatiga iyo shahaadada waxay bogga Provider Hub waxa u isticmaalaan:

- Shatiga/shaahaado qaadashada
- Maamulidda isdiiwaangelinta bixiyayaasha ee ku aaddan ka qaybgalka Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Carruurta
- Ka qaybgalka Barnaamijka Lacagta Taakulaynta Mushaarka ee Billaabista Wanaagsan
- Diiwaangelinta iyo soo xaadiridda

***Marka Qaybahaan bogga Provider Hub ay Diyaar u Noqdaan Bixiyeyaasha Daryeelka Carruurta ee Qoyska, Waxaad si sahlan ku geli doontaa boggan.*** Wax dheeraad ah ka baro bogga [Provider Hub webpage].



*Updated 7/8/2025. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2025 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

## Goormaa U Baahan Doontaa bogga Provider Hub Inaad U Adeegsato Helidda Shatiga

Waxaan horey u sheegnay in daah-furka shatiga daryeelka carruurta ee qoyska loogu talagalay bogga Provider Hub inuu billowdo xagaaga 2025. ***Waxaan hadda dib u eegaynaa suurtagalnimada daah-furidda boggan waqtigan si aan u hubinno inaan guul kala kulantid.*** Waqtiga daah-furka rasmiga ah weli lama cayimin.

Waxaan fahamsannahay in isbeddelka ku yimid waqtiyada daah-furka uu keeni karo walaac iyo niyad-jab. Waan kaaga mahadcelinaynaa samirkaaga. Waa kan macluumaadka aan hayno:

### Tijaabo

Waxaan ku tijaabin doonaa shatiga daryeelka carruurta ee qoyska bogga Provider Hub degmooyinkan soo socda: **Becker, Cass, Crow Wing, Douglas, Hubbard, Morrison, Stevens, Todd and Wadena.** waxayna degmooyinkaan la kaashadaan hay'adda Sourcewell helidda shatiga daryeelka carruurta ee qoyska.

Waxaan ogeysiin doonnaa bixiyeyaasha daryeelka carruurta ee qoyska ee degmooyinkan **60 maalmood ka hor** inta aan la daah-furin bogga tijaabada ah. Tijaabadan hore waxay socon doontaa muddo hal bil ah.

### Daah-furka Heer Gobol

Ka dib tijaabada hordhaca ah, bogga Provider Hub wuxuu si rasmi ah uga billaaban doonaa heer gobol. Farriinteenna soo socota, waxaan kula wadaagi doonnaa jadwalka daah-furka ee heer gobol.

Waxa lagugu wargelin doonaa waqti hore ka hor inta adiga iyo bixiyeyaasha kale ee daryeelka carruurta ee qoysaska ku sugan gobolkaaga aadan billaabin inaad bogga Provider Hub u isticmaashid shati-helidda.

Waxaan qaban doonnaa dhacdo taageero toos ah (in-person) oo ka dhici doonta gobolkaaga xilliga aad billaabayso isticmaalka bogga Provider Hub si aad u heshid shatiga. Waxaan bixin doonnaa xogo dheeraad ah oo ku saabsan dhacdooyinkan marka la soo gabogabeeyo faahfaahinta muhiimka ah.



*Updated 7/8/2025. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2025 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

## Waxaad Hadda Qaban Kartaa Kuwan Soo socda

Hoos waxaa ku qoran isu diyaarinta isticmaalka bogga Provider Hub iyadoo la raacayo tallaabooyinkan:

- **Iska diiwaangeli warsidaha Provider Hub:** Waxaad iska diiwaan gelin kartaa warsidaha halkan.
- **Booqo bogga Provider Hub:** Waxaan cusbooneysiinnaa bogga Provider Hub webpage mar kasta oo qaybo cusub oo ka mid ah aaladda la dhammeeyo ama ilo cusub la daabaco.
- **Kor u qaad fahamkaaga tiknoolajiyadda:** Fiiri ururinta ilo ku saabsan tiknoolajiyada. Waxaa ka mid ah Hagaha xirfadaha tiknoolajiyada ee loo baahan yahay si loo isticmaalo bogga Provider Hub, Qiimeyn iskaa ah (self-assessment) oo ku saabsan xirfadahaaga tiknoolajiga, Liis ah ilaha laga heli karo qalabka iyo caawimaadda tiknoolajiga.

## Faa'iidooyinka Provider Hub

Waxaan aad ugu faraxsanahay inaan ku soo bandhigno faa'iidooyinkan la socda bogga Provider Hub:

- **Si sahlan oo loo helo adeegyada:** Ka daawo oo ka maamul xogtaada shatiga iyo barnaamijyada meel kaliya. Waxaad bogga ka heli kartaa xogtaada wakhti kasta, adigoo isticmaalaya aalad kasta.
- **Kaydinta dijitaalka ah ee xogta:** Ku keydi xogtaada gudaha aaladda oo kaliya cusbooneysii marka ay isbedesho.
- **Taageero dheeraad ah:** Hel taageero si aad u isticmaasho bogga Provider Hub adoo ka helaya koox taageero maxalli ah — onlayn ahaan iyo telefoon. Waxa kale oo aad heli doontaa taageero joogto ah oo ka imanaya kormeerahaaga shatiga iyo shaqaalaha barnaamijyada — waxay awoodi doonaan inay arkaan xogta aad geliso bogga Provider Hub.
- **Luqado badan:** Isticmaal aaladda adigoo dooranaya Af-Ingiriis, Af-Hmong, Af-Soomaali ama Af-Isbaanish.



*Updated 7/8/2025. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2025 State of Minnesota. All Rights Reserved.*

## Nala Soo Xiriir

Haddii aad qabto wax fikrado ah ama su'aalo, waxaad farriin noogu soo diri kartaa iimaylka kooxda Provider Hub oo ah ccproviderhub.dhs@state.mn.us.

**Waad ku mahadsan tahay dhammaan shaqadaada qiimaha leh ee aad u qabato daryeelka carruurta iyo qoysaskooda guud ahaan gobolka Minnesota!**



*Updated 7/8/2025. Qoraalkan mowduucayada ku jira waa mid hadda jira ee taariikhdan la soo bandhigay. State of Minnesota waxay xaq u leedahay inay cusboonaysiiso ama dib u eegto sida ay markaa u aragto.*
*©2025 State of Minnesota. All Rights Reserved.*